


# Baadhida kansarka mindhicirka



**Haddii aad u dhaxeysid da'da 50 iyo 74, waxaa lagaa baadhi karaa kansarka mindhicirka iyo malawadka (kansarka mindhicirka). Baadhitaanka kansarka mindhicirka waa baadhitaanka ragga iyo dumarka ee aan laheyn astaamaha kansarka mindhicirka.**

**Maamulka Caafimaadka Danishka waxay ku talinayaan baaritaanka kansarka mindhicirka. Lakiin waa muhiim ah, inaad adiga naftaada go'aan garto.**

## Maxaa laguugu martiqaaday baadhitaanka?

Haddii kansarka mindhicirka xilli hore la ogaado, fursadaha daaweynta ayaa wanaagsanaada. Sidaas darteed, waxaa lagugu casuumay baaritaan, xittaa inkastoo aadan laheyn astaamaha kansarka mindhicirka.

Xitaa haddii lagu baadho, weli waxaad qabtaa ama kugu dhici karaa kansarka mindhicirka. Sidaas darteed, waa inaad had iyo jeer la xiriirtaa dhakhtarkaaga haddii aad qabtid astaamaha sida:

- Socodka saxarada oo isbadelo
- Xidmaha oo iskood si sax ah isku faaruqinin,
- Daal aan la sharaxi karin
- Calool xanuun
- Dhiig ama xab ku jiro saxaradaada
- Miisaanka oo dhaca sabab la'aan

## Sidee loo sameeyaa baadhitaanka?

Gobolkaaga ayaa kuu soo dirayo xidhmo ay ku jiraan waxyaabaha aad u baahantahay si aad baaris uga qaadid saxaradaada. Markaad dirtid baarista saxaradaada, waxaa laga baadhayaa qayb yar oo dhiiga ah. Haddii aanay ku jirin wax dhiig ah saxaradaada, waxaa lagugu deeqayaa inaad soo dirtid baaris markale labo sanno kadib. Haddii, dhinaca kale, dhiig laga helo baaristaada, waxaa lagugu deeqayaa baarista kamarada mindhicirka. Baadhitaankaan wuxuu

### Gobolkaaga ayaa kaaga jawaabi kara su'aalahaaga

Gobolkaaga ayaa kaaga jawaabi kara su'aalo kasta oo ku saabsan baadhitaanka iyo marka la gaadho wakhtiga baadhitaanka cusub.

**Gobolka Wuqooyiga Denmark:** +45 9764 1712

**Gobolka Bartamaha Denmark:** +45 7842 0170

**Gobolka Koonfurta Denmark:** +45 7940 6785

**Gobolka Zealand:** +45 5651 2828

**Gobolka Caasimadda Denmark:** +45 3867 1717

muujin karaa haddii aad qabtid kansar ama burooyin (buro mindhicirkaaga ku jirto) oo noqon kara kansar.

## Waa maxay faa'iidooyinka baaritaanka?

- Waxaa jira fursado wanaagsan ee daaweynta, haddii kansarka goor hore la ogaado. Ka qeybqaadashada baadhitaanka, waxaad yareyn kartaa halistaada inaad u dhimatid kansarka mindhicirka.
- Haddii kansarka la ogaado xili hore, waxaa jiro fursado waagsaan ee daawayn aad u baah-saneyn.

## Waa maxay khasaaraha baaritaanka?

- Xitaa haddii dhiig laga helo baarista saxaradaada, lama hubo inaad qabtid kansar ama cudur kale oo mindhicirkaaga ama malawadka. Sababta ayaa badelkeeda noqon karto dhiig bax ka imaanaa xoqid ama baabasiir. Muddada aad sugayso ee natiijooyinka baadhitaanka ama baadhitaan dheeraad ah ayaa sababi kara walwal. Xitaa haddii wax dhiig ah aan laga helin baarista saxarada, si kastaba waxaa laga yaabaa inaad qabtid ama kugu dhaco kansarka mindhicirka.
- Dadka qaar waxay la kulmaan raaxo la'aanta markay iska qaadaan baarista saxarada. Intooda badan waxay la kulmaan raaxo la'aan, markii saxarada dawada jilciisa looga so saaraya mindhicirka, ka hor inta la samayn baarista kamarada mindhicirka.
- Waxaa jiro halista daaweynta aan lama huraanka ahayn, ayaado baadhitaanada qaarkood. ogaan karaan burooyin aanan noqoneyn kansar. Baadhitaanada ayaa sidoo kale ogaan karo kansar aanan ku saameyneyn noloshaada. Daawaynta aan lama huraanka ahayn ayaa yeelan karta saameyn waxyeelo xun leh.

Waxaad ka akhriyi kartaa wax ku saabsan kansarka mindhicirka iyo barnaamijka baadhitaanka [www.sst.dk/screening](http://www.sst.dk/screening) ama adiga oo ku sawirayo **koodhka QR** kaamirada mobeelkaaga.

